

Ka qayb qaado joojinta faadida jeermiska corona!

Adduunka waxaa ku faafaya jeermiska cusub ee corona. Jeermiska corona waxa uu sababaa cudurka la yiraahdo covid-19. Cudurkani waxa uu u egyahay inta badan hargab caadi aha ama infuluweensa. Dadka uu ku dhaco cudurkaan intooda badani aad uguma xanuunsadaan.

Talooyinkan hoos ku qoran waxa ay ku saabsan sidii aad adiga iyo dadka kaleba uga badbaadi lahaydeen cudurka:

- Gacmaha ku dhaq inta badan saabuun iyo biyo kulul ugu yaraan 20 ilbiriqsi.
- Hadii aysan suurto gal kuu ahayn inaad dhaqdo gacmaha – isticmaal aalkolda gacmaha.
- Faraha haku taaban indhaha, sanko iyo afka.
- Marka aad qufacayso ama aad hindhisayso u dhig xagasha garabka.
- Xiriir dhow hala samayn dadka xanuunsan.
- Iska ilaali inaad la kulanto dad kale hadii aad adiga xanuunsan tahay ama aad dareemayso inuu ku haayo hargab fudud.

Wixii faah faahin ah oo intaas dheer oo ku saabsan jeermiska corona iyo cudurka covid-19 raac talooyinka hoos ku qoran:

- Ka raadso wixii macluumaad dheeraad ah krisinformation.se.
- Hadii aad macluumaadka aad doonayso ka wayso boga krisinformation.se waxa aad wici kartaa 113 13.
- Hadii aad u baahan tahay talooyin qof xirfadle caafimaad ah waxa aad wici kartaa 1177.
- Bogga laanta socdaalka ee migrationsverket.se waxa aad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan sida uu jeermiska corona uu saamayn ugu yeelanayo hoowlaha laanta socdaalka.